Gacan ka geyso sidii Minneapolis ay nadiif u noqon laheyd!

Iyada oo si wadajir ah looga shaqeynayo nabadgelyada, caafimaadka, iyo nolosha bulshada.

City of Minneapolis
Regulatory Services

Hubinta nadaafadda xaafadaha ee joogtada ah ayaa idinku soo fool leh!

Guryaha oo si haboon loo daryeelo waxa ay xoojisaa xaafadaha. Sanad walba waaxda Adeegga Baaritaanada waxa ay soo maraan xaafadaha si ay u xakameeyaan buuqa xaafadaha iyo xadgudubyada degaanka. Nidaamka ayaa u ogolaanaya in mulkiilayaasha guryaha ay muddo todobaad gudihiisa ku saxaan qaladaadka. Haddii aan qaladaadka lagu sixin mudadaas, qandaraaslayaasha magaalada ayaa qabanaya hawsha lacag ayaana laga qaadayaa mukiilayaasha.

Aan wadajir uga shaqeyno sidii bulshadeenu u noqon laheyd goob si wanaagsan loogu noolaan karo!

Halkan hoose waxaa ku xusan xadgudubyada ay shaqaalaheenu si gaar ah u eegaan:

Cawska dhaadheer iyo geedka ka dhex baxa cawska "weed" dhererkoodu waa inuu ka gaaban yahay sideed inji. Qandaraaslayaasha magaalada ayaa jaraya daaradaha guryaha aan waqtiga ku haboon la jarin.

Gaadiidka aan socon karin waa in aan lagu heyn guryaha la degan yahay. Waxaa ka mid ah gaadiidka banjarka ah iyo kuwa taargadoodu dhacday. Gaadiidka aan sharciga waafaqsaneyn waa la jiidayaa.



Qudaarta la beerto waa in aanay soo gaarin dhulka lagu socdo, wadooyinka iyo kuwa xaafadaha dhex mara. Waa in marshabiyeediga uu kor u furan yahay ilaa 7' iyadoo wadooyinka xaafadaha dhex marana la doonayo in ay kor u furnaadaan 14' Qandaraaslayaasha magaalada ayaa jaraya laamaha kor isaga xiran.

Daaradaha waa in laga nadiifiyaa qasahinka, haraaga iyo biraha duugga ah. Guryaha oo si haboon loo daryeelo waxa ay muujineysaa in dadku daryeelayaan xaafadahooda. Qandaraaslayaasha magaalada ayaa qaaday qashinka dheeraadka ah iyo haraaga.

Laamaha iyo keymuhu waxa ay soo jiitaan cayayaanka, dabna way dhaliyaan, laguma keydin karo daaradda guriga, waa in la isku xiraa oo la fogeeyaa. Qandaraaslayaasha magaalada ayaa qaadaya keymaha aan si haboon loo fogeyn.

Su'aalo?

Waxaanu diyaar u nahay in aan idin caawino! Macluumaad dheeraad ah iyo faahfaahin ku saabsan waxyaabaha aan eegeyno, kala soo xiriir bogga internetka ee minneapolismn.gov/inspections/.

Si aad u soo sheegto xad gudub ama haddii aad qabtaan su'aalo dheeraad ah, soo wac 311 ama 612-673-3000 telefoonada ka baxsan magaalada.